



Khatarta aan la Arki karin

Kiimikada radon waa mid si dabiici ah u dhacda oo ah gaas radioactive ah oo aadan arki karin, urin karin ama dhadhamin karin. Waxaa jirta kiimikada radon oo heerkeedu sareeyo oo ah mid si dabiici ah u dhacaysa oo ka jirta dhowr goobood oo guud ahaan ka tirsan Portland. Kiimikada radon waxay raacdaa carrada waxayna gashaa dhismayaasha, sida guryaha, dugsiyada iyo goobaha shaqada.

Haddii in la yareeyo loo baahdo - nidaam dhuun hawadu marto oo leh marwaxad ayaa la dhisaa. Nidaamku wuxuu kiimikada radon kor uga soo qaadaa dhismaha hoostiisa iyada oo hawadu sii marayso saqafka halkaasi oo badbaado leh loogu kala diro hawada dibadda.